

Hidderaaca keena Maqal La'aanta

EARLY HEARING DETECTION AND INTERVENTION (OGAANSHAH
XILLIGA HORE IYO WAXQABADKA MAQALKA DHEGAHA AMA, EHDI)



Maxaa sababa maqal la'aanta?

Sababaha maqal la'aanta dhallaanka iyo dadka qaangaaray waa ay kala duwan yihii. Ugu yaraan 25% maqal la'aanta nuunneyaasha waxaa sabab u ah dhibaato (sida dhaawac ama faayrus) laakiin 50% ilaa 60% sababta keenta waa mid ah hidderaacid (CDC, 2023). Mararka qaarkood, dhibaato iyo hidderaacid ayaa labadaba maqal la'aanta sababi kara. Sababta in la ogaado aalaaba suurtagal ma aha, laakiin marka ay isku dayaan, waalidka ama daryeeleyaashu, in ay ogaadaan sababta waxa ay isbeddel fiican u noqon kartaa in ilmaha lagu caawiyo korriinka iyo koboca maskaxeed.

Sidee baan ku ogaan karaa in ay sababtu tahay hidderaacid?

Dhakhtarka ilmaha gaabilsan in ilmaha loo gudbiyo kaasoo ku takhasusay qiimeynta hidderaaca. Xataa haddii aysan jirin dad ka mid ah qoyskaaga oo ah dhegoole ama dhega culus, sababta maqal la'aanta ee ilmahaaga waxa ay noqon kartaa hidderaacid. Haddii ay qoyskaaga ku jiraan dad dhegoole ah ama dhega culus, waa in aad u sheegto dhakhtarka aad u geynayso ilmahaaga.

Maxay tahay sababta uu ogaanshuhu muhiim u Yahay?

Maqal la'aanta nuunnaha waxay noqon kartaa qeyb ka mid ah dhibaato weyn oo saameyn ku leh caafimaadka ama koboca maskaxeed. Qiimeynta hidderaaca ayaa caawimaad u noqon karta hagista go'aamada daryeelka ee aad mustaqbalka sameyn doonto, sida markaad isla hadleysaan ilmaha iyo wixii ah waxqabad ama agab waxbarasho oo ilmaha ku caawin doona tacliinta iyo korriinka. Waxa aad ogaaneyso waa tasiilaad qiimo leh oo aad sii habeysan doonto si aad wax uga qabato baahiyada shakhsiga ah ee ilmahaaga.

